



# Barnaamujka soo gelidda

SOMALISKA

utbildningsinfo.se

Skolverket

**Laga bilaabo sannad dugsiiyeedka xilliga dayrta 2011 dugsiga sare waxaa la siinayaa shan barnaamuj oo soo gelid ah oo beddelayo barnaamujka gaar ahaaneed (IV) oo loogu talagalay ardayda aanan u qalmin barnaamuj qarameed. Shantaas barnaamuj waa barnaamuj diyaarin ah, barnaamuj himiladiisu tahay doorasho khaas ah, barnaamuj hordhaca xirfad, suurtoagal shakhsiyeed iyo barnaamujka hordhaca luuqad.**

Barnaamujyaashaan laguma qaato shahaado dugs isare, laakiin fikradu waa in ay ku gaarsiiyaan barnaamuj qarameed ama shaqo.

Waxbarashadu waxaa la dhiganayaa wakhti buuxa, iyo sidoo kale waxbarashada waxa ay ka koobnaandoonto waxaa lagu go'aamin doonaa qorshe waxbarasho oo gaar ahaaneed. Waxbarashada kaddib waxaa la qaadan doonaa caddeyn waxbarasho.

Haddii aadan u qalmin barnaamuj qarameed waxaad xaqq u leedahay in aad dhigatid barnaamuj soo gelid. Barnaamujka oo aad dhigankartid waxa ay ku xirnaan kartaa ujeedada aad waxbarashadaada la leedahay barnaamujka. Suurtogal kale waxaa ahaan karo haddii aadan u qalmin, in aad ugu badnaan labo sano oo kale aad sii dhigatid dugsiga aasaasiga ah.

Si aad macaawimo uga heshid in aad ogaatid barnaamujka adiga kugu habboon, waxaad la hadli kartaa macallinka waxbarashada- iyo xirfadda iskoolkaada jooga.

## SHAN XABBO OO BARNAAMUJKA SOO GELIDDA OO KALA DUWAN

### Barnaamujka diyaarinta

- Barnaamujka diyaarinta waxaa loogu talagalay qofkii rabo in uu dhigto barnaamuj qarameed oo laakiin ay ka maqanyihiin hal ama dhowr shahaado oo lagu baaso oo loo bahaanyahay.

Waxbarashadu waa ugu badnaan hal sano. Waxbarashadu marka ugu horeysa waxay ka koobnaan doontaa maadooyinka dugsiga aasaasiga ah oo aadan ku baasin oo aad u baahantahay si aad ugu gashid barnaamuj qarameed. Waxaad sidoo kale akhrisankartaa kooras waxbarasho oo ka mid ah barnaamujka qarameed, sidoo kale waxbarashadu waxa ay ka koobnaan kartaa dadaalo kale aad ugu baahantahay horumarka cilmigaada. Marka aad gaarto u qalmidda barnaamuj qarameed baa markaas, haddii boos bannaanyahay, geli kartaa barnaamujkaa.

Sidoo kale waxaad dooran kartaa barnaamujka diyaarinta haddii xitaa aad u qalmantahay barnaamuj xirfadeed. Markaas barnaamujka diyaarinta waxaad u dooraneysaa si aad u qalmantid barnaamuj jaamacadda diyaarin u ah.

### **Barnaamuj himiladiisu tahay doorasho khaas ah – PRIV**

- PRIV waxaa loogu talo galay qofka rabo in uu dhigto barnaamuj xirfadeed, laakiin ay ka maqanyihiin hal ama dhowr shahaado oo lagu baaso oo loo bahaanyahay.

Waxaad u baahan tahay ugu yaraan shan maadooyin aad ku baastay, kuwaas waxaa ka mid ah iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqadda labaad ah, si aad u dhigatid PRIV. Waxbarashadu waxa ay ka koobanaan doontaa maadooyinka dugsiga aasaasiga ah oo aadan ku baasin oo aad u baahantahay si aad u gashid barnaamuj xirfadeed. Sidoo kale waxaad koorsooyin ka akhrisan kartaa barnaamuj xirfadeed, sidoo kale waxaad aadi kartaa shaqo gacmeed (spl). Marka aad gaarto u qalmidda barnaamuj xirfadeed baa markaas, haddii boos bannaanyahay, geli kartaa barnaamujkaas.

### **Barnaamuj hordhaca xirfad**

- Barnaamujka hordhaca xirfadda waxaa loogu talo galay qofkii rabo waxbarasho hadefkeedu yahay xirfad, laakiin ay ka maqanyihiin hal ama dhowr shahaado oo loo baahanyahay in la dhigto PRIV ama barnaamuj xirfadeed.

Barnaamujka hordhaca waxa uu ka koobnaan karaa waxbarasho si aad shaqo u heshid ama si aad u codsatid barnaamuj xirfadeed. Waxbarashadu waxay tusaale ahaan ka koobnaan kartaa maadooyinka dugsiga aasaasiga ah oo aadan adigu ku baasin, koorsooyin oo aad ka akhrisaneysid barnaamuj xirfadeed, shaqo gacmeed (apl) ama tababar ama dadaalo kale oo aad ugu baahantahay horumarka cilmigaada. Waxbarashada kaddib waxaad raadsan kartaa shaqo ama waxaad dhigan kartaa barnaamuj xirfadeed.

### **Suurtogal shakhsiiyeed**

- Suurtogal shakhsiiyeed waxaa loogu talo galay qofkii rabo waxbarasho si uu shaqo u helo ama si uu waxbarasho dugsiga sare ka dhigto. Qofkaa waxaa ka maqan in badan oo shahaadooyinka loo baahanyahay si loo bilaabo barnaamuj qarameed.

Waxbarashadu waxay tusaale ahaan ka koobnaan kartaa maadooyinka dugsiga aasaasiga haddii uusan qofku maadooyinkaas shahaado ka haysan, koorsooyin ka mid ah barnaamujka qarameed iyo dadaalo kale oo aad ugu baahantahay horumarka cilmigaada. Waxbarashada kaddib waxaad raadsan kartaa shaqo ama waxaad dhigan kartaa dugsiga sare.

### **Barnaamujka hordhaca luuqad**

- Qofkii mar dhaw yimid Iswiidhan oo ay ka maqanyihiin shahaadooyinka maadooyinka loogu baahanyahay in la dhigto barnaamuj qarameed oo sidoo kalena u baahan waxbarasho luuqadda iswiidhishka in uu dhigto.

Waxbarashadu waxay ka koobnaan doontaa waxbarasho luuqadda iswiidhishka iyo sidoo kale waxay ka koobnaan kartaa maadooyin kale ee dugsiga aasaasiga, maadooyin ka mid ah barnaamuj qarameed iyo dadaalo kale aad ugu baahantahay horumarka cilmigaada. Waxbarashada kaddib waxaad dhigan kartaa dugsiga sare ama waxbarasho kale.